Stiftelsen Blakstad Sykehus Boligselskap

La aasaasay Febraayo 1967.

SHARCIYADA WADISTA IYO BAARKINKA BAABUURTA
ee xarumaha/aagaga Stiftelsen Blakstad Sykehus Boligselskap

14.06.2019

Qodobka 1aad

Dhamaan dadka deegaanka ah iyo kuwa soo booqda waa in ay raacaan sharciyada soo socda ee ku saabsan wadista iyo baarkinka baabuurta ee xarumaha/aagaga iskaashiga guryeynta. Haddii ay dhacdo in sharciyadani la jebiyo, ganaax ayaa lagu rogi doonaa. Xaaladaha halista ahna, waxaa macquul ah baabuurta in laguha laga xiro lana jiido. Xarumaha baarkinka waxaa loogu talagalay baabuurta miisaankeedu yahay ilaa 3500 kg.

Qodobka 2aad

Dadka deegaanka ah ee isticmaalaya meelaha baabuurta la dhigto ee ku yaala gudaha ama dibedda ee xarumaha iskaashiga guryeynta**waa inay**Xafiiska Guriyeynta siiyaan lambarkooda diiwaangelinta gaadiidka. Lambarkan waxaa diiwaangelinaya shirkadda baarkinka waxaana loo isticmaali doonaa in lagu hubiyo in gaariga loo ogol yahay gudaha xarumaha. Ku guuldareysiga diiwaangelinta gaari waxay sababi doontaa ganaax. Ganaaxan wuxuu quseeyaa baarkinka dibada ah iyo baarkinka gudaha geeraashka ah. Dadka deegaanka ah ee loo qoondeeyey meel bannaan oo loogu talagalay baarkinka gawaarida ee ku yaala aagga baabuurta la dhigto ama garaashka waa inay isticmaalaan meeshaas. **Keliya gawaarida la diiwaangeliyey ayaa la dhigi karaa goobaha baabuurta la dhigto iyo garaashyada.** Dadka deegaanka ah waxaa waajib ku ah inay xaqiijiyaan in albaabada xiranyihiin marka ay ka baxayaan goobta baabuurta la dhigto ama geeraashyada, haddii ay gaari wataan iyo haddii kalaba.

Qodobka 3aad

Gawaarida, badeecada / tareelaha doomanka, gawaarida xayawaanka iwm ee aan diiwaangashaneyn **lama**ogola in la dhigo xarumaha iskaashiga guryeynta, hanoqoto dibada ama gudaha goobaha baarkinka baabuurta ama geerashyada. Gawaarida noocaas ah waa la jiidi doonaa iyado oo kharashkeeda iyo masuuliyadeeduba ay korka ka saaran tahay milkiilaha. **Goobta baarkinka la cayimiyey ee ku taala xarumaha baarkinka baabuurta waa in loo isticmaalo gawaarida waaweyn ee lagu qaado baabuurta yeryer.**

Dhamaan gawaarida, gaadiidka / gawaarida xamuulka, gawaarida doomanka iwm ee baarkinka ku jira, oo hor istaagaya wadista baabuurta iyo dhaqdhaqaaqyada joogtada ah ee dadka degaanka ah ee isticmaala goobta, iyo dhinacyada jidadka dibedda ah, isla markiiba lagu soo rogi doonaa ganaax.

Ku dayactiridda baabuurta gudaha meelaha baabuurta la dhigto ama meelaha kale ee ay iska leeyihiin iskaashiga guryeynta lama oggola. (Bedelaada taayirada waa la aqbali karaa)

Qodobka 4aad

Martida waxaa loo oggol yahay inay gawaaridooda dhigaan meelaha baabuurta la dhigto ee banaanka ah. Dhamaan guryaha waxaa la siiyaa laba oggolaansho oo baarkinka martida ah. Oggolaashahani**WAA INAY**isticmaalaan dadka martida ah. Waa mas'uuliyadda dadka deegaanka ah inay xaqiijiyaan in dadka soo booqda ay oggolaanshaha baarkinka martida geliyaan muraayada hore ee gaariga. Haddii ay jiraan Baahiyo la xiriira baarkinka ee ku-meel-gaar ah, la xiriir Xafiiska Guriyeynta. Ku guuldareysiga inaad soo bandhigto ogolaanshada baarkinka ee dadka martida ah waxaa ay sababi doontaa ganaax.

Qodobka 5aad

Isticmaalka goobta baarkinka ee loo isticmaalo in gaari alaab**laga dejiyo ama lagu raro**waa la ogol yahay lakin waa ilaa iyo 15 daqiiqo. **Ku-waditaanka ama dhigida baabuurka meelaha cawska leh, meelaha lagu ciyaaro, meelaha lagu raaxeysto iyo goobaha la midka ahba lama ogola.**

Xawaaraha ugu sareeya ee loo ogol yahay agagaarka guryaha waa 10 km / h. Wixii baahi gaar ah oo la xiriira baarkinka, fadlan la xiriir xafiiska guryaha.

Stiftelsen Blakstad Sykehus Boligselskap

La aasaasay Febraayo 1967.

Qodobka 6aad

Marka ay ka baxayaan ama ay soo galayaan, dadka deegaanka ah waa inay haystaan rukhsada ku meel gaar ah ee wadista iyo baarkinka gaariga haddii ay rabaan inay gaariga ka dejiyaan alaab, iwm. Tani waa la sameeyaa inta u dhexeysa muddada 9ka subaxnimo - 9ka galabnimo
Marka raritaanka/dejinta la dhammeeyo, nooca gaadiidka waa in la dhigaa meel banaanka ah.
Ku guuldareysiga inaad soo bandhigto ogolaanshada baarkinka waxaa ay sababi doontaa ganaax.

Qodobka 7aad

Dadka deegaanka ah ee doonaya boos bannaan si ay u jaajareystaan gawaarida korontada, waa inay ka codsadaan xafiiska guriyeynta si ay u kireystaan xarunta jaajareynta. Fadlan akhri qawaaniinta ku saabsan qodobkan. Isticmaalida Korontada kuleylka xarunta keenta ama fiilooyinka dheeriga ah si loogu jaajareeyo gawaarida noocan**ah waa mamnuuc**.

Qodobka 8aad

Tilmaamayaasha loogu talagalay xarumaha la wadaago ee baarkinka baabuurtaoo ka socda Waaxda Dabdemiska Asker iyo Bærum, waa kuwo aad u muhiim ah, waana in la fuliyaa qodobbadiisa.
Tilmaamahan iyo xeerarka guud ee baarkinka baabuurta waa in la saxiixaa
OGSOONOW: Dhismayaasha iskaashiga guryeynta waxaa ay saxiix ka haystaan Q-Park, taas oo ah waaxda kormeerka ee qandaraaska lagula galay dardargelinta xeerarka wadista iyo baarkinka gawaarida xilli walba.

Stiftelsen Blakstad Sykehus Boligselskap

Etablert februar 1967.

Tilmaamaha loogu talagalay xarumaha la wadaago ee ah baarkinka baabuurta

Dabka ka kaca xarumaha baarkinka baabuurta la dhigto, gaar ahaan kuwa dhulka hoostiisa ah, waxay caqabad weyn ku noqon kartaa waaxda dab-demiska si ay wax uga qabtaan. Sidaa darteed, waxaa muhiim ah in sida ugu macquulsan loo kaydiyo oo khatarta dabkana uu noqdo mid aad u hooseeya.

Shuruudaha iyo tilmaamaha loogu talagalay xarumaha la wadaago ee baarkinka baabuurta

- Kaliya baabuurta iyo qalabka baabuurta ayaa lagu keydin doonaa xarumaha la wadaago ee baarkinka baabuurta. Qalabka baabuurta waxaa halkan loogu isticmaalay in lagu macneeyo saqafka baabuurta/ qalabka cayaarta barafka / sanduuqa qalabka cayaarta barafka iyo taayirada.
- Lama ogola in lagu dhax sameeyo dayactirka baabuurta ama shaqo kasta oo keeni khatarta dabka.
- Lama oggola in gaaska guban kara lagu kaydiyo baarkinada dhulka hoostiisa ah.
- Dareeraha guban kara laguma kaydin doono xarumaha baabuurta la dhigto.
- Xarmaha baabuurta la dhigto waa inay ku xirnaadaan qalabka dabka lagu damiyo ee gacan-qabadka ah ama waa inuu lahaadaa nidaamka dab deminta ee gaara qol walba. Qalabka dab-demiska ee gacan-qabadka ah waa inuu u hoggaansamaa ugu yeraan heerka waxtarka 21A. Qalabka dab-deminta waa in si cad loo calaamadeeyaa.
- Jidadka laga baxo waa in la calaamadeeyaa.
- Qalabka farsamada, sida qalabka dab-deminta, albaabada dabka aan karin, rusheeyayaasha, nidaamka digniinta dabka, saarista hawada qiiqa, iwm. Waa in ay u shaqeeyaan sidii loogu talagalay oo si joogta ah waa in loo kormeero.
- Baabuurta korontada lagu jaajareeyo, tani waxa kaliya lagu sameyn karaa xarumaha si gaar ah loogu talagalay ujeedadaas.
- Baabuurta korontada ku shaqeeya waa in la dhigaa meel u dhow albaabka garaashyada ama xarunta baarkinka looga galo / baxo.

"Shakhsi kasta waxaa waajib ku ah inuu muujiyo feejignaan uuna dhaqangeliyo feejignaanta si dabka, qaraxyada iyo shilalka kale looga hortago." Sharciga Ka Hortagga Dabka iyo Burburka Qaybta 5aad

Isticmaalaha / qofka guriga leh ayaa masuul ka ah hubinta in shuruudaha iyo tilmaamaha la raaco.

| --- | --- | --- |
| Kiraystaha | Wakhtiga iyo goobta | Stift. Emma Hjort Bolig. |